


# Bilow lacag bixinta dhijitaalka ah



Buug tilmaamaha ee fudud  
oo loogu talogalay Android



Länsstyrelserna

# Waayo buug tilmaamaha oo fudud?

Maaddaama oo ay hadda dad badani meel kaligood fadhiyaan, oo ayna leeyiniin fursad xadidan oo ay ku dhex mushaaxaan/wareegayaan bulshada dhexdeeda oo ay dadka kale ula kulmi karaan, ayaa baahida loo qabo in wax lagu bixin karo telefoonka casriga ah ama tablet-ka ay badatay. Qofka aan khibrad u lahayn, oo aan haysan qof la jooga oo ka caawin kara, ayay dabcan ku adkaan kartaa inuu bilaabo. Länsstyrelsen ayaa sidaas darteed soo saartay buug tilmaamaha ee fudud oo loogu talogalay mobilada iyo tablet-ka, ee Android iyo iPhone labadaba, kaas oo la rajeynaayo inuu waxtar yeelan karo.


Buuga tilmaamaha ee fudud ayaa sidoo kale qaraabada iyo shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka taageero u noqon kara.

Buuga tilmaamaha ee fudud waxa la sameeyay iyada oo ku saleysan guud ahaan moobaylada Andriod ah. Waa taas mid la mid ah wax shaqeynaaya noocyada kala duwan, laakiin waxay shaashada uga muuqan kartaa mid ka duwan.

## Hordhac


Waayo buug tilmaamaha oo fudud?	2
1. Koonto sameyso, waxa loogu yeero Google-konto	3
2. La soo deg App-ka bangiga iyo Mobilt BankID	13
3. La soo deg oo ku bixi Swish	26
4. Macluumaadka amniga oo booliska ka socda	37

# 1. Koonto sameyso, waxa loogu yeero Google-konto




Waxa loo baahan yahay Google-konto si loola soo degi karro barnaamijyada ("app-ka") sida Internet-bank, BankID iyo Swish iyadoo la soo maraayo adeegga Google Play Butik ee mobilkaaga ku jira.

1. Fartaada ka soo jiid cidhifka kore ee shaashadda si aad tusmada inställningar ugu aragto.




2. Riix "inställningar" taas oo ku geyn doona inställningar ka moobaylka.




1. Koonto sameyso, waxa loogu yeero Google-konto


### 3. Riix "Användare och konton".




### 4. Riix qoraalka. "Lägg till konto".




5. Dooro "Google".



6. "Skapa konto".



7. Sheeg magaca hore iyo ka danbe: Ka dibna riix "Nästa".




8. Ku qor taariikhda dhalashada iyo jinsiga. Markaad dhameysid riix "Nästa".




9. Samee cinwaan emaylka oo koontadaada Google-konto ah.




10. Ku qor xaraf sir ah. Waa inuu ugu yaraan lahaado 8 xaraf.




## 11. Akhriso qoraalka.



## 12. Calaamadee labada sanduuq oo ansaxi shuruudaha. Riix "Skapa konto".




13. Riix "Bekräfta" si aad  
ugu sii waddo.




14. App-ka cusub ee Google  
ayaa ka soo muuqan  
doona safka xarafka  
sirta ah.


Astaanta ugu horreysa  
waa Google Play Store.




## 15. Riix "Play Store".



Sawirka ku yaala Google Play Store.



Haddii hadhow aad rabto  
inaad hubiso ama wax aad  
ka beddesho inställningar  
koontadaada Google-konto,  
ayaad taas ku soo galaysaa  
adigoo soo maraata bogga  
internetka: accounts.google.com



## 2. La soo deg App-ka bangiga iyo Mobilt BankID



### **Waxaanu soo qaadi doonaa laba shay**

- A. Sida aad ula soo degayso oo aad ugu rakibeyso app-ka bangiga 14
- B. Sida aad ula soo degayso oo aad ugu rakibeyso Mobilt BankID 21

## A. Sida aad ula soo degayso oo aad ugu rakibeyso app-ka bangiga

Bangiyada leh app-ka bangiyada ee moobaylka ee soo saara BankID:


- Danske Bank
- Handelsbanken
- ICA Banken
- Länsförsäkringar Bank
- Nordea
- SEB
- Skandiabanken
- Sparbanken Syd
- Swedbank
- Ålandsbanken

Waxaad app-ka baniga ka heli kartaa Google Play Butik. Bogga soo socda, waxa aanu kuugi sheegi doonaa sida loola soo degayo app-ka bangiga.




**Hoosta waxa talaabo talaabo laguugu  
tusayaa sida loola soo degoo oo loogu  
rakibeyso app-ka bangiga**


1. Riix astaan qaabka  
saddex xagalka ah leh  
ee wadata qoraalka  
"Play Butik".




2. Ku qor magaca bangigaaga oo ka dibna raadi.




3. Tusaale ahaan: Waxaan dooranayaa bangiga moobaylka ee anigoo safkan riixaaya.



#### 4. Riix qoraalka "Installera".




#### 5. Riix "Öppna".




6. App-ka la isku  
habeynayaa.




7. Dooro inaad ku soo  
gasho e-koodhkaaga  
(kaadh-akhriye) ama  
koodhka shaqsi ahaaneed.




8. Ku qor lambarka shakhsiga. Riix "Logga in".



9. Bilow kaadh-akhriyeha adigoo kaarka bangiga gelinaya. Ka dib raac tilmaamaha oo soo gal.




10. Hadda waxaad soo  
gashay app-ka bangiga  
ee moobaylkaaga.




## B. Sida aad ula soo degayso ee aad ugu rakibeyso Mobilt BankID

Si aad ugu bixiso moobalkaaga ayaad ugu baahan tahay aqoonsi dhijitaal ah, waxa loo yaqaano aqoonsi elektarooniga ah. Waxa maanta jira saddex aqoonsi oo elektaroonik ah oo la ansixiyey: BankID oo ka soo baxa bangiyada, AB Svenska Pass iyo Freja eID+. Ta caadi ahaan ugu badan ee lacag bixintu waa Mobile BankID, taas oo aad bangigaaga internetka ka dalbatid.


Haddii aadan weli bangiyada internetka haysan, waa inaad booqato xafiiska laanta bangigaaga si aad ugu bilowdo. Buuga tilmaamaha ee fudud aaya caawimo kuu noqon kara markaad guriga joogtid.




1. Riix astaan qaabka saddex xagalka ah leh ee wadata qoraalka "Play Butik".




2. Sanduuqa raadinta ku qor "Mobile BankID".




3. Ka dooro adigoo riixaaya badhanka safka.



4. Riix "Hämta" oo ka dibna riix "Öppna".



5. Soo gal bangigaaga-internetka oo dalbo Mobile BankID.  
Waxay bangiga internetku uu u muuqan karaa siyaabo kala duduwan, iyadoo ku xiran bangiga aad leedahay.  
La xiriir bangigaaga haddii aad dhibaato la kulanto.  
Ka dibna riix "Hämta BankID" adiga moobalkaaga.




6. Ku buuxi lambarkaaga shakhsiga iyo koodhka hawlgalinta/shidista ee bangigaaga internetka SMS kuugu soo siri doono.



7. Dooro koodhka aqoonsiga oo leh ugu yaraan 6 lamber. Waa koodhkan ka aad ka dib u isticmaali doonto si aad aqoonsigaaga ugu muujiso BankID-gaaga.



8. Tijaabi Mobile BankID adigoo riixaaya koodhkaaga. Ka dibna riix "Fortsätt".



### 3. La soo deg oo ku bixi Swish




Swisha

#### **Waxaanu soo qaadi doonaa**


- |   |    |
|---|----|
| A. La soo deg appka Swish   | 27 |
| B. Ku bixi Swish  | 29 |
| C. Ogolow lacag bixinta   | 30 |
| D. Ku bixi Swish - qayb dheeri ah   | 31 |
| E. Swish - Taariikh   | 33 |
| F. Inställningar - Favoriter (Kuwa ugu jeceshay),<br>dadka aad inta badan swish wax ugu dirto | 34 |

## A. La soo deg appka Swish


1. Riix astaan qaabka  
saddex xagalka ah leh  
ee wadata qoraalka  
"Play Butik".



2. Sanduuqa raadinta ku qor  
Swish, riix raadinta marka  
ay soo muuqato oo app-  
ka swish ula soo deg sida  
laguu tilmaamay.



3. Waa inaad Swish ka ku xidhaa lambar moobayl.
- Markaad app-ka Swish furto marka ugu horeysay, ayaad heli doontaa tilmaamo ku saabsan sida aad sameyn doonto. Talaabada ugu horeysaa waa inaad bangigaaga internetka soo gasho. Waxay bangiga internetku uu u muuqan karaa siyaabo kala dud-awan, iyadoo ku xiran bangiga aad leedahay. La xiriir bangigaaga haddii aad dhibaato la kulanto.



## B. Ku bixi Swish

1. Fur app-ka Swish oo riix "Swisha".




2. Ku qor lambar moobayl ama riix calaamada toganaha/isku geynta si aad ugu hesho liiska xiriirkaaga.

Ku buuxi cadadka lacagta ah.

Ku dar fariin (iskaan ikhtiyaar ah).

Riix "Swisha". Taas macna-heedu ma aha inay lacagtu tageyso. Tallaabada xigta waxaad ku hubin kartaa inuu qofka loo dirayaan sax yahay.




## C. Ogolow lacag bixinta

1. Hubi macluumaaadka Ku  
saxeex koodhka amniga.




2. Sumadda orgiga iyo  
xiddig dhacaysa ayaa  
ku tusaysa in lacag  
bixinta la sameeyey.




## D. Ku bixi Swish - qayb dheeri ah

1. Riix "Skicka med ett kort".




2. Dooro nooca kaadhka  
aad rabto inaad ku dirto.



3. Riix astaanta. Kaadhka gadaashiisa ayaa lagu tusayaa.

Riix "Välj kort".




## E. Swish - Taariikh

1. Riix "Taariikhda" si aad ugu aragto lacagtaadii aad swish ku heshay ama aad ku dirtay.




2. Waxaa "All" hoosteeda ku arkeysaa dhamaan swishka soo galay iyo kuwa ka baxay. Wuxuu aad sidoo kale riixi kartaa "Mottagna" ama "Skickade".




## F. Inställningar - Favoriter (Kuwa ugu jeceshay), dadka aad inta badan swish wax ugu dirto

1. Riix astaanta inställningar.




2. Riix "Favoriter".




3. La soo deg oo Swish ku bixi


### 3. Riix "Ny Favoriter".




### 4. Ku buuxi magacaaga iyo lambarka-telefoonka ama riix tabaneha si aad u furto xiriiradaada.



## 5. Riix "Enter-pilen".



## 6. Waxa aad kuwaad ugu jeceshay toos uga heli doontaa aragtida lacag bixinta, qeybta qoraalka "Mottagare" hoostiisa.



## **4. Macluumaaadka amniga oo booliska ka socda**

### **Waxyaalaha u baahan in laga fikiro:**

- Waligaa ha isticmaalin aalada bangiga ama BankID marka uu qof kula soo xiriiray kaa codsado.
- Waligeed ayaan cid daacad ahi telefoonka kugu weydiisan doona inaad BankID siiso. Ma aha bangiga, ma ahan booliska, ma ahan boostada.
- Waligeed ayaan cid daacad ahi emayl ahaan kugu weydiisan doona xarafka sirta. Ma aha bangiga, ma ahan booliska, ma ahan Microsoft ma ahan Google.
- Khayaanada telefoonka la iska soo wacaayo ayaa aad u sii kordheysa.
- Dad badan ayaa lacagtooda ku waaya iyadoo la khiyaameeyay oo ay macluumaaadka kaararka iyo koodhka dhiiba ama bangigooda soo gala.
- Farriin digniin ah oo ku saabsan khiyaano ayaa lagu tusayaan app-ka isticmaalaha, haddii ay socoto iskuday soo galitaano isku mar dhacayaa. Markaa ka dib la xiriir bangigaaga isla markaaba.



## La xiriir Länsstyrelsen Skåne:

Catharina Hellström Engström, telefon 010-224 13 72  
[catharina.hellstrom.engstrom@lansstyrelsen.se](mailto:catharina.hellstrom.engstrom@lansstyrelsen.se)

Lisbet Smolka Ringborg, telefon 010-224 16 36  
[lisbet.smolka.ringborg@lansstyrelsen.se](mailto:lisbet.smolka.ringborg@lansstyrelsen.se)

**Wax dheeraad ah ka akhri bogga:**  
[www.lansstyrelsen.se/skane/betaltjanster](http://www.lansstyrelsen.se/skane/betaltjanster)

*Enkel manual för Android på somaliska*

Waxa la diyaariyey ka dib wadashaqeyn lala sameeyey Länsstyrelserna.  
Sawir: Sawirada ugu badan



---

Länsstyrelserna

---